XAFIISKA NABADGALYADA EE DEGMADA SAN DIEGO

WARBIXINTA BADQABKA DADWAYNAHA

OKTOOBAR 2024

Tilmaamaha khaldan ee Maadooyinka THC ee ka yimaada Daawada Aan Dhakhtarku Qorin

Khataraha Qarsoon ee Agabka Ka samaysan Hemp

Maadooyin badan oo sheegta in "laga sameeyay Hemp" ayaa la iibiyaa kuwaas oo ka koobnaan kara heerarka khatarta ah ee maadada tetrahydrocannabinol (THC), oo ah maadooyinka ugu culus ee ku jira xashiiska oo sababi kara "sarqaan," ayna ku jiraan alaabo badan oo sheegta inaysan ku jirin THC. Agabka sida gaamka, nacnaca, cabitaannada, iyo xanjada ayaa si fudud loogu khaldi karaa cuntooyinka caadiga ah ee fudud ee ilmaha.

Baakad been Abuur ah: Agab sheeganaaya inay yihiin (kuwo laga sameeyay Hemp) ayaa u ekaan kara nacnaca ama cuntooyinka fudud ee maalin kasta.

Xayiisiin Been abuur ah: Agabka qaar ayaa sheeganaaya in ku jirto cadadka THC oo kayar 0.3% laakiin sida dhab ah waxaa ku jira cadad aad uga badan intaas..

Suuqyada Aan Sharciga ahayn: Agabka lagu iibiyo dukaannada alaabaha yaryar ama oonlaynka ayaan laga dooneyn inay soo maraan qiimeynada caadiga ah ee difaaca macaamiisha ama qiimeynada badqabka.

“Tilmaamaha been abuurka ah ayaa keeni kara in dadku isticmaalaan agabka sida xun loo maamulay iyo agabka raqiiska ah ee CBD badelkii aad heli lahayd agabka ay FDA ogolaatay ee la xaqiijiyay inay yihiin kuwo badqab leh oo waxtar u leh xaalad caafimaad oo gaar ah,” ayuu yiri Tory Spindle, Ph.D., Kuliyada Caafimaadka ee Johns Hopkins University.

SHAYGA LAGU XAYIISIIYAY **KUAMA JIRAAN MAADOOYIN LA MAMNUUCAY**



BAARITAANKA SHAYBAARKA DANBIYADA EE XAFISKA **NABADGALYADA AYAA AQOONSADAY THC KU JIRTA MAADADA**

Delta 8-tetrahydrocannabinol+ Delta 8-tetrahydrocannabinol acetate + Hexahydrocannabinol + Delta 9 THC-P

Saameynada la Xiriira Agabka THC

Cunista cadadka badan ee THC ayaa keeni karta dhibaatooyin xunxun oo caafimaad, gaar ahaana ku dhaca ilmaha iyo dhalinyarada.

Saameynada ka dhalan kara waxaa kamid ah jaho wareer, dawakhaad, dabeecad xumo, sarqaamid, lalabo, iyo xataa in isbitaal la dhigo xaaladaha daran.

Cunista THC ee ilmaha yaryar ayaa saameyno muddo dheer ah ku yeelan kara kobaca maskaxda.

Si loo sheegto in ay tahay daawo ama loo adeegsan karo sababo caafimaad, agabku waa inuu ogolaansho ka haystaa FDA.

Ku dhawaad CBD/THC

Isha xogta: David G. Evans, JD, Missouri Medicine

Cannabidiol (CBD) waa saliid laga miiro geedka xashiiska. Farqiga wayn ee u dhexeeya CBD iyo THC waa in THC ay abuuri karto dareenka "sarqaanka" ee maskaxda halka CBD aysan abuurin.

Dadka ayaa u cunaaya ayagoo u qaba inaysan waxyeelo lahayn, hase yeeshee, CBD ayaa carqad ku noqon karta daawooyinka kale ama waxaa ku jiri kara maadooyinka kale ee xashiiska sarqaanka ee cannabinoids.

Hemp waxaa lagu qeexaa xashiiska iyo maadooyinka laga sameeyo oo ay ku jirta cadadka aadka u yar (wax ka yar 0.3% oo miisaanka qalalan ah) ee maadada THC. Isbadeladaan ayaa ka saaray Hemp Sharciga Maadooyinka Xakamaysan ee federaalka, taasoo ka dhigan in aysan sii ahaan doonin mid sharci daro ah sharciga federaalka.

SOO SHEEG / CODSO XOG DHEERI AH:

marijuanaenforcement@sdsheriff.gov ama booqo www.sdsheriff.gov/resources/thc